# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Hadal-qoraalka iyo Gudiyadda

## Kal-fadhigii 35aad Fadhigii 9aad

**27/11/2017**

**Fadhigu Wuxuu furmey 10:09 AM**

**Gudoomiyaha: -** Baashe Maxamed Faarax

**Quraan: -** Xildibaan Faarax Maxamed Cabdille

**Ajendaha Fadhiga: -**Dooda Abaaraha

**Gudoomiyaha: -** Fadhigu wuu inoo furan yahay maanta waxaan galaynaa Qodobka labaad ee ajandaha sida shalay aan u balanay waxaanan ku soo dhaweynayaa xildhibaanada dooda ka qayb qaadanaya, waxaana ka qayb qaatay mudanayaasha kala ah: -

**Mrw. Baar Siciid Faarax: -** Mudane Guddoomiye iyo Golaha sharafta leh waan salaamayaa. Guddoomiye saxaafadi ma joogto yaa wax gaadhsiinaya.

Guddoomiye sidaynu la socono abaarihii waxay marayaan meel halis ah, dadkii u qaxay Putland waxa ku soo baxday qorax kulul. Waxa la gaadhay wakhtigii kulaylka, markaa waxa ku soo baxday qorax xooluhu aanay daaqayn oo dadku aanay joogi karayn. Dadkaasi waxay u baahan yihiin in loo gurmado oo la soo raro oo dalkoodii lagu soo celiyo wax kasta ha kala kulmaane. Iyana waxa jira dadka wixii gaadiid helay way soo noqdeen oo xoolihii iyo dadkiiba waxay cunaan ma haystaan. Waa qaxoonti cusub oo soo noqday, waxay ka soo noqdeen dhul gaadhaya ilaa 800km oo qaarkoodan joogaan oo ku hadheen.

Waxaan Guddida abaaraha iyo xukumada u soo jeedinayaa, waxaan is leeyahay xukumadii way seexatay oo waxan dhacayaba ma oga, waxay ku mashquushay arrimo kale.

Waxaan soo jeedinayaa in loo gurmado dadkaas iyo dadka kale ee reer Somalilandba ah. Galbeed iyo Barri imika isku mid ayey noqotay, markaa waa in loo gurmadaa dadka oo fadhiga laga kacaa oo waxan kale ee faraha lagula jiro la dhigo. Waa in gawaadhiga $ 8000 iyo $100,000 ee lagu tamashlayno ha soo guraan dadka iyo carruurahan bakhtiyaya.

Waa in loo adeegsadaa gaadiidka ciidamada xitaa kuwa shacabka ha la raafo oo shidaal ha lagu shubo siday dadka u soo guraan.

**Soo jeedin: -**

- Haddii laygu raaco waxaan soo jeedin lahaa in la fasaxo iskuulada iyo Golayaasha Qaranka, Wasiiradan 200-ka ah ee Madaxtooyada hoganaaya dadka ha gurmadaan oo Madaxweynuhu ku dhawaaqaa.
- Waa in uu ku dhawaaqaa xaalad deg dega oo haddii dadka danlaga leeyahay deg deg wax looga qabtaa.

**Md. Cali Maxamed Adan (Cali Bare): -** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, Alxamdulilaahi Rabbil Caalamiin. Maadaama oo aynu ku jirno Agendaha qodobkii saddexdaad ee xaalada abaarta. In Goluhu ka hadlo oo si dhab ah, uga hadlo waa waajib ina saaran. Hadalka lagaga hadlayaa waa in aanu noqon mid caadifadaysan ama cid gaar ah u jeeda. Adigu haddii aad doonayso khayr cid kale lama duro, haddii aad cid kale durto khayrkaagii waa kaa burayaa. Haddii talaabada aad qaadaysaba cid gaar ah aad u jeedo wax meesha qabta maaha horta oo haddii aynu khayr u jeedno aynaan iska burin.

Waxa weeye Qaranbaynu nahay Qarankuna nidaam iyo shaquu kala leeyahay, xaaladan abaaryuna waa mid samaawiya, waa mid ilaahay loola cawdaa. Bani-aadmigu wuxuu taraa waa wax aad u yar, laakiin dadaalbaa la inaga doonayaa. Waxaan maqlayey rag lahaa ha la jaro dhawr kun oo dollar , rag lahaa ha la fasaxo golaha oo ha la shaqo tago, goluhu muxuu ku shaqo tagayaa taayiraba malahee, xildhibaanadu ma ayagaa taayiraba leh maxay ku tagayaan, mida kale xaalada maxaynu kala soconaa oo xagay wax marayaan qof suuqa lagala soo hadlay ama tilifoon ku soo dhacay, guryaha afartan afartan qof ayaa noo jooga oo soo qaxay, maalin oo dhan tilifoonku wuu nagu socdaa, laakiin warka aad golaha keenaysaan waa in aanu kaa noqone mid rasmiya uu noqdaa oo nidaamsan, oo qaab dawladeed ah oo isku duubniya.

Markaa Guddoomiye niman aan cidaba ka joogin oo hargeysa iska jooga sida nac-nac oo kale yaanu iska qaylin. Qofku markuu hadlaayo haantaada qaroorteed wax looguma qaybiyo.

**Soo jeedin: -**

- Mudane Guddoomiye waxaan leeyahay oo aan soo jeedinayaa in Guddida abaaraha haloo yeedho oo aynu wax waydiino xaalada abaaraha oo aynu la xisaabtano oo war ka dhagaysano oo xitaa 3 cisho ha socotee aynu dhagaysano nimankaas lana xisaabtano ka dibna war ka soo saarno.

**Md. Cabdiraxmaan cisman Caalin: -** Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Guddoomiye arrinta abaaruhu waa mid samaawiya, maaha mid ay cid samaysay cidna lagu canaanan maayo. Inagu gole ahaan xaq waxaynu u leenahay intaynu arrimahan doodno in aynu talo bixin soo saarno, cid allale cidii aynu u aragno in aynu war ka heli karnana in aynu u yeedhano.

Waxaan qabaa in aan bahasha la siyaasadayn oo aanu siyaasad inaga noqon. Noloshii iyo xoolahii dadkeenu qarkay saaranyihiin markaa siyaasada aynu ka dayno.

Waxaan odhan lahaa anigu xaqiiqooyin badan ma hayno. Guddida abaarahee la inoo sheegayaana maasha hay'ad sharci ah oo aynu hawl u dirsanay oo xeer aynu kula xisaabtano iyo xeer aynu hawl ugu diranay maaha. Waxaan leeyahay aan soo jeedinayaa in aynu arrinta sidayna u qiimayno. Markii hore waxa laga cabanaayey xalafka xoolaha imikana biyo la'aan ayaa dhacday arrintuna imika waa siman oo dadkii waxay wada joogaan deegaanaan ahayn koodii ayey joogaan. Meeshaas ayey joogaan biyana kumahaystaan baadna kuma haystaan oo dhinacnaba ugama guuri karaan oo biyo la isu dhaaminayo ama la isasa siinayaan ma jiraan. Meelaha qaar xoolihii waxay baxeen 100% , meelaha qaar xoolihii way baxeen 80% halka meelaha qaarna xoolihii baxeen 60%.

Waxa weeye noloshii dadkeenu qarkay saarantahay, iska daa xoolihii ama biyihiiba markaa waxaan odhan lahaa ha loo sameeyo meelo la isugu keeno.

Bahasha aynu yara buho buhayno oo Madaxweyne ku xigeenka oo Guddoomiyaha Guddida Abaaraha aynu u yeedhno iyo wasiirada ay khusayso. Haddii uu yahay wasiirka maaliyadda, wasiirka Deegaanka ha loo yeedho oo horteena ha soo fadhiisaantaan iyaga aynu warbixin ka qaadano.

Waxa jira shirar iyo dhaq dhaqaaqyo socda. Wakhtigan oo kale waxa u haboon marka xaalada guud la gooyo waxay noqonaysaa xaalad qaran, markaa aynu taas ku dhaqaaqno oo ku hawlgalno. Inagu yeynaan iska boodine talo qaran weeye, talada qarankana miiska ha la isku fadhiisto.

**Soo jeedin: -**

- Qarashaadka ha la joojiyo wixii aan ahayn shidaalka iyo istayshanariyada.
- Ta labaadna gurmad qaran ha la qaado oo ayeynaan inagu iska yaacin oo aynaan inagu u yeedhano hay'adihii Qaranka oo Madaxweyne ku xigeenku ku jiro aynu u yeedhno oo aynu nidhaahno anagu waxan haynaa intanoo talo bixinee maxaad haysaan, sidii looga baxayaa.

**Md. Cabdilahi Xuseen Cige: -**Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Allaa humasali calaa Muxamed. Guddoomiyaha iyo xildhibaanada waan salaamayaa.

Marka intaanan hadalka bilaabin waxaan soo jeedin lahaa in marka hore illaahay aynu dadka u barino taasaan lagaga baxayaa abaartee. Waxaan soo jeedin lahaa anigu fikir ahaan waynu ognahay abaartu halka ay marayso baaxadeeda iyo halkay gaadhay. Waxa inala gudboon marka hore intaynaan talo bixi soo saarin inagu bal xaaladu halkay marayso cidii gacanta ku haysay in aynu u yeedhano wax ka waydiino.

Markaynu aragno Madaxweyne ku xigeenku isagaa Guddoomiyaha Guddida abaaraha ah, markaa isaga iyo inta la shaqaysa intaynu u yeedhno aynu is xogagaal waraysano oo halka wax marayaan, warbixinta ay hayaan, xaaladu halkay joogto markaynu intaa helno aynu talo-bixinta samayno. Ka gole ahaan markaasay inoo haboon tahay markaynu warbixintii helno in aynu nidhaahno waxaas iyo waxaas ayaa lagaga bixi karaa. Waxa laga yaabaa war badan oo aynu qof qof hayno in ay wax ka badan hayaan.

**Waxaan soo jeedinayaa**

- Waxaan soo jeedin lahaain aynu u yeedhno Guddida abaaraha iyo Madaxweyne ku xigeenka waxay odhanayna markaas ka dib nidhaahno.
- Waxaan odhan lahaa marka aynu talada helno in aynu dhanka miisaaniyada aynu u jeedino dhinaca abaaraha.
- Ugu dambayntii waxaan leeyahay Dawladu fadhiga ha ka kacdo.

**Md. Axmed Maxamed Diiriye (Nac-nac): -** Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Allaahu musali calaa mawlanaa Muxamed. Illaahay waxaynu ka baryeynaa in Illaahay abaarta inaga soo jabiyo oo roob khayr qaba Illaahay inoo shubo.

Taasi waa taas horta waxaan ka codsanayaa Xildhibaanada in aynaan siyaasad iska gelin oo aynu si muslinimo ah uga hadalno abaarahaa iyo sidaynu wax uga qabanayno inaga oo gudaheenana ka bilaabayna.

Gudaheena aynu ka bilawno oo dadku ha inagu daydeen oo kuwa meelahaas ka hadlaa ha ku bixi lacagta abaaraha. Anigu waxaan u tagay guddida abaaraha Ilaahaybaa umadda wax gaadhsiiyee, markaa nimankani way shaqaynayaan ee dadka ayaa ka badan, waxaan leeyahay inagu waynu wax bixino oo aynu bil kasta $ 1000 bixino.

Waxaan leeyahay kuwa leh dawladu wax may qaban, waxaan leeyahay dawladu way qabatay waanay qaban doontaa.

**Md. Cumar Axmed Saleebaan (Sanweyne): -** Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Allaahu masala calaa sayidinaa Muxamed wacalaa aalihii wasaxbihii wasalam, Ugu horayn waxaan leeyahay qofka rayigiisa waan in loo daayaa laguna ixtiraamaa. Gudoomiye abaartu wadanka way saamaysay aad iyo aadna way u saamaysay waanay ku sii kala badan tahay ha sii kala badnaadeene oo waxaa jir meelo aanay dawlada Somaliland-ba aanay gaadhin oo dawlada Ethiopia aanay imaan oo iyagaba abaaro ayaa hayee dadkaasi waa dadka kilirka dagen oo waana halka xoolaha Somaliland ay ka yimaadaan, taasina talo ayay u baahan tahay.

Waxaan ka warqabaa in gudida abaaraha maahee gudi kale ay fadhiyaan ayna ka hadlayaa arimahan aan hada ka hadlayno waxaan ku raacsanahay xildhibaanadii soo jeediyay in aan war doono "*war la helyaaba talo la hel*" bal halka ay wax marinayaan talo soo jeedin teenuna ay noqoto, wax allaale wixii horumarin ah ee misaaniyada inoogu jira meel kale oo aan wax ka soo qaadno garan maynee waa in abaaraha lagu jeheeyaa in sadexda bilood ee soo socda la joojiyo wixii kharashaad ee ay dawladu leedahay ee aan ahay ku aan u baahnayn in la joojiyo, sidoo kale in aan u yeedhno Gudidda Abaaraha ee wasiirada leh ee madaxweyne ku xigeenku ugu sareeyo ama aan gudi u dirno oo wixii aan ula tagayno aan imika isasii nidhaa waad mahadsantihiin.

**Soo Jeedin: -**

- waa in loo yeedho Gudidda abaaraha ee uu ugu sareeyo Madaxweyne ku xigeenku
- sidoo kale waa in sadex biloodka soo socda la joojiyaa wixii kharashaad ah

**Md. Axmed Maxamed Nuur: -**Salaamu Calaykum waraxmatulahi Wabarakaatuhu, Salaan kadib waxaad moodaa in aan isaga waramayno wax aynaan war kahayn, maah-maah ayaa waxay tidhaa "*Abaskuul meelna ma wada seexan warna iskuma seegana*" maanta waxa wadan ka jira waan ka wada war haynaa waynanu ka dharagsanahay oo nin walba Deegaankii laga soo doortay iyo kuwa kalaba wuu ka warhayaa.

Marka arinku sidaa yahay, hada dadkii ayaa bastood ah ee xoolo weydhamaadeen. Cumar waxaan ku raacsanahay dadka qaar ayaa kilirka shanaad daga oo dadkaasi waa basbeel oo waxaabay marmar dhankaa kilirka shanaad wax uga yimaaadaane waa bas-beel, raashinka yare ee loo keena inta meel loogu wada walaaqo ayay ku wada

xanuunsadeen in kastoo ay inaga aan waxba u walaaqina ay ina dhaamaan, Waxaa loo baahanyahay in loo gurmado deg-deg ah la sameeyo oo hawshiisa u baahan.

Gudidda Abaaraha marka hore Gudiddan abaaruhu waxaad moodaa in ay dhinac ka rarantahay, waxaanay ahay in dadka abaaraha yaqaana ee sida looga dabaasha yaqaana la diraa ayay ahayd oo gudi laga dhigaa ayay ahayd inkastoo iyaguna ay dhibaataysan yihiin oo waa dad la yidhi dad dhibaataysan wax u ururiya una qaybiya oo aniga ahaan halkii la iga soo doortay waan ka cabanayaa.

Sidaa awgeed malaha Gudiddu waxay maraan kaliya inta ay laamaydu marto ee dhulka rafka ah looguma talo galin. Xoolihii way dhamaadeen oo hada dadkii Ayaan u cabsi qabnaa.

Waxaan leeyahaysidii xildhibaanadii iga horeeyayba ay sheegeen waan in loo yeedhaa gudidda abaaraha iyo madaxda qaranka ee Madaxweynuhu uu hogaaminayo ama Madaxweyne ku xigeenku oo ay warbixin sugan ay ina siiyaan way fiican tahay.

Dadkaa bakhtiyaya ee aan soo sheegay waxaa la sheegayaa in raashimadii lagu caawiyay ay qaar wali ISTOODHADA AY KU JIRAAN OO AAN WALI LOO QAYBIN! Waxaan leeyahay waa inagu ceeb wixii la inagu caawiayay in aynaan wali qabin deg-deg ha loo qaybiyo Ayaan leeyahay oo gudidda abaaruhu umada ha u qaybiso raashinka yaala waaba laga bakhtiyayaa oo inana aan istoodhada ku haynaa.

Waxaa kale oo aan ku raacsanahay Cumar Sanweyne wixii miisaaniyada taakulayn ku jira waa in loo wareejiyaa dhanka abaaraha**.** Umada waxaan ilaahay ugu baryayaa isaga ayaa inaga saari kara abaaraha e in uu inaga saaro oo uu ina siiyo madax khayr qaba oo mus-ka waraaba in uu si Deg-deg ah inoogu shubo Ayaan alle inooga baryayaa wasalaamu Calaykum waraxmatulaahi wabarakaatuhu.

**Soo jeedin: -**

- Waan in loo yeedhaa gudidda abaaraha iyo madaxda qaranka ee Madaxweynuhu uu hogaaminayo ama Madaxweyne ku xigeenku oo ay warbixin sugan ay ina siiyaan.
- Waa in wixii miisaaniyada ku jirta loo wareejinaa dhanka abaaraha.

**Md. Faarax Maxamed Cabdille: -**Bismilaahi raxmaani Raxiim alxamdulilaahi rabil Caalamiin Wasalaatu wasalaamu Calaa Afrafil Anbiyaa wal Mursaliin. Amaa Bacdu Asalaahu Calaykun waraxmatulaahi wabarakaatuhu, mudane gudoomiye waan la qabaa

xildhibaanada soo jeediyay in Gudidda abaaraha loo yeedho oo ay warbixin ina siiyaan waan la qabaa waanan taageerayaa waxaa kale oo aan taageerayaa gudidu in ay noqoto mid isku dheeli tiran oo gobolada oo dhan ka kooban, Matalan aniga waxaa la iga soo doortay Gobolka Saaxil, guddida abaaruhuna wali ma tagin siiba qaybta bariga hadii ay xeeb ahaan iyo gubanba ay tahay.

Sidaa awgeed waxaa cad in ay tahay gudi aan isku dheeli tirnay dhulka qaarna aan wada mari karin, gudiddi aan lugayn karin oo aan gaadhin karin meelaha aanay baabuurta gaadhi karin gaadha, waxaa laga yaabaa in uu dad ku xanuun sanayo loona baahan yahay in loo gar-gaaro oo loo lugeeyo, markaa waxaan leeyahay waa in ay noqotaa gudi u bisil oo wadanka oo dhan wada mari karta.

**Waxaan soo jeedinayaa** oo aan u soo jeedinayaa Madaxweynaha iyo ku-xigeenkaba: -

- Gudidda anaga oo aan wax ceeba ka sheegay oo ay u badanyihiin Gudi Culimo ah, hadana waxaa loo baahan yahay gudi u bisil oo wadanka ka wada warkeeni karta.
- Waxaa jira hay'ado raashinka iska haya oo uu bakhaaradooda ku dhaco oo ay ka mid tahay WFP oo raashinkaa dhacay la siin lahaa dadka iyo xoolahaba waayo waxba ma hayaan oo way cuni lahaayeen wixii la siiyaba
- Waxaa kale oo aan la qabaa xildhibaanadii iga horeeyay in miisaaniyada qaranka in la joojiyo dhamaan kharashaadka oo dhan, hadii aanay ahayn wixii laga maarmaar ah oo kaliya la isticmaalo mushaharooyinka.
- In goluhu soo saaro go'aan laga shaqaynayo abaaraha oo la joojiyo waxyaaba kale oo dhan, waayo wali waxaa socdo ololayaaashii

Aniga oo aan siyaasadaynay waxaan leeyahay aan iska dayno waxan aan xukuumada ku riixayno qaar kalana difaacayaan, waxa aan ka hadlaynaa waa noloshii dadka waxaanan leeyahay aan iska dayno arimaha siyaasada oo aan isweydiinaa maxaa maanta talo ah ee gurmadkaa lagu gali karaa oo aan si dhab ah u waraysanaa cida ka masuulka ah ee inoo timaada waana in ayna noqon mid ku xumays ah. Waana in goleheena wax ka soo baxaan oo inaga lafteenu aan ka qayb qaadana arimaha socda markaa.

Waxaa kale oo aan leeyahay awalba waan goyn jirnee hada waa in aan goynaa sidii awalba aan u goyn jirne, dadkana waa in aan dhiiri galinaa wixii abaaraha lagu qabanayo waana in aan dadkeena badbaadinaa oo aan ururino oo aan dhulka biyaha leh la geeyo waanad mahadsantihiin.

**Gudoomiyaha: -** Sixitaan mudanayaal sida aad wada ogtihiin miisaaniyada afar shay mooyaane waa la joojiyaya miisaaniyada oo wareegto ayaa laga soo saaray waana la joojiyay.

**Soo Jeedin: -**

- In Gudidda abaaraha loo yeedho si wax looga waydiiyo halka ay wax u marayaan oo ay warbixin dheeli tiran ina siiyaan.
- Guddidaa anaga oo aan wax ceeba ka sheegay oo ay u badanyihiin Gudi Culimo ah, hadana waxaa loo baahan yahay gudi u bisil oo wadanka ka wada warkeeni karta.
- Waxaa jira hay'ado raashinka iska haya oo uu bakhaaradooda ku dhaco oo ay ka mid tahay WFP oo raashinkaa dhacay la siin lahaa dadka iyo xoolahaba waayo waxba ma hayaan oo way cuni lahaayeen wixii la siiyaba
- Waxaa kale oo aan la qabaa xildhibaanadii iga horeeyay in miisaaniyada qaranka in la joojiyo dhamaan kharashaadka oo dhan, hadii aanay ahayn wixii laga maarmaar ah oo kaliya la isticmaalo mushaharooyinka.
- In goluhu soo saaro go'aan laga shaqaynayo abaaraha oo la joojiyo waxyaaba kale oo dhan, waayo wali waxaa socdo ololayaaashii

**Md. Xuseen Maxamed Cige: -** Bismilaahi Raxmaani Raxiim Asalaamu Calaykum Warax-matulaahi Wabarakaatuhu, ducadiina amin Ayaan leeyahay xildhibaanadii iga horeeyay waxaan leeyahay si wanaagsan ayay u hadleen wanan ku taageersanahay, marka laga reebo hal kalmad oo nin xildhibaan ahi uu yidhi caadifad iyo wax uu lahaa.

**Gudoomiyaha: -** Xildhibaan ha tixraacin ee doodaada wado
Waxaan leeyahay arintan aan maanta ka hadlaynaaba caadifad ah waanan ku raacsanahay wixii la sheegay oo dhan hase ahaatee waxaa ku darayaa laba qodob oo yar yar, midi waxaa weeyi sidaa la sheegay xoolo laga quusay ee dadkii ayaa hada dhimanaya arimahan aan maanta wad-wadnaa soomaalidu hore ayay uga maah-maahdoo waxay tidhi *"dhicisku inta birta loo soo siduu ka bakhtiyaa"* gole ahaan waa in aan si degdeg ah wax u ururinaa oo kolba halkii ay u xuntahay waa in lagu aadiyaa.

Soo jeedintii aan shalay soo jeediyay waxay ahayd: - in aan **$1000 Dollar** aan iska gaynaa bishii xildhibaan kasta, sida uu xildhibaan kii iga horeeyay sheegay **$2000 Dollar** ah wey ku yara badantahay Ayaan leeyahay
Qodobka labaad waxaa uu yahay waxaan la yaabanahay oo la yidhi abaartani waa abaartii ugu xumayd ee abid ina soo marta ilaa hadana maan maqal wax lagu dhawaaqay xaalad deg-deg ah waxaan odhan lahaa in golahan sharci dajinta ee la soo

doortay waa in uu hada ku dhawaaqaa xaalad degdeg ah oo aan gole ahaan galnaa xaalad degdeg ah waanad mahadsantihiin.

**Soo jeedin: -**

- Waa in golahan sharci dajinta ee la soo doortay uu hada ku dhawaaqaa xaalad deg-deg ah
- Waa in kharashaadka miisaaniyada la joojiyaa loona leexiyaa abaaraha.

**Md. Ibrahin Axmed Reygal:- -** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, mudane gudoomiye iyo mudanayaalba waad salaamantihiin, waxaan aad iyo aad ugu faraxsanay in aan mawduucaa abaarta aan ka hadalno, waana mid munaasiba in aan ka hadalno, hadii aan u soo gudbo wixii aan ku darsan karo qodobada, dhamaan wixii la soo jeediyayna waan taageersanahay, waxaan se ku darsanayaa Saddex Arimood oo aan ku saabsan warbixinta aan ka hayo abaaraha waana mid laga wada dharagsanyahay hadii ay noqon lahayd meeshii uu ka soo jeeday iyo dalka intiisa kalaba.

Abaaruhuna sida aad lawada socotaan soomaali oo dhan ayay ku dhacday, laakiin markii aan dadka waraystay sedex qaab ayaa ugu xumaaday oo ay abaartu ugu darantahay.

Midi waxaa weeyi dadkii guuray ee marba meel u cararay oo hadana meel kale roob loogu sheegay waxayna ka mid noqdeen dadka ugu xun ee dhexda ku baa'bay waxaanay ugu badantahay dhanka Hawdka iyo dadka u hayaamay Puntland iyo Gabolabeedka Somaliland oo iyaga iyo dadkii ay u hayaameenba isla bas-beelay. Waxaa kale oo Iyana aad u xun dhulka buuralayda ah ee laamiyada ka fog, tusaale ahaan hadii aan soo qaado Gobolka sool ama Saraar ha lagu sheegee inta aan ka warhayo waxaa ugu xun dhulka buuralayda ah sababta oo ah cidi ma tagin. Dadkaasi badi waxa kaliya ee ay haystaan waa biyo laakiin raashin ma haystaan in kastoo ay gudida abaaruhu tageen.

Inta badan waxaa loo soo baxay Gobol gobal ee waxaa wanaagsan in Gobol kasta laga warbixiyo oo la yidhaa bal kawaran gobolkii aad ka soo baxday oo la yidhaa ka waran maxaad ka haysaa taasina waxay keenaysaa in xildhibaanku ka warhayo Gobolkiisii.

Waxaan kale oo aan taageerayaa mudane gudoomiye kalmada ha loo yeedho waxaan u arkaa in ay yara adagtahay waxaan u dhigi lahaa adiga iyo Gudi yar maanta aan u magacawno waana in ay ka kulmaan xukuumada iyo gudidda Abaaraha oo ay noqdaan qaab wardoon oo kale, si ay hawshana u midawdo weynu oganahayoo xuukamada ayaa hawshii wadaye.

**Soo jeedin: -**

- In aan ka wardoono cida Hawsha wada oo ah xukuumada iyo gudida abaaraha,
- Gudoomiye waxaa kale oo aan ku soo ururinayaa wacyi-galin halaga sameeyo Masaajidada iyo Hotelada waaweyn ee la isugu yimaado Ayaan soo jeedinayaa waad mahadsantihiin.

**Md. Cabdiqaadir Jaamac Xaamud: - -** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, waan salamayaa shirgudoonka, mudanayaasha, saxaafada iyo martida kaleba waan salamayaa. Waxaan filayaa in aan cidiba aanay mooganayn xaalada uu dalku marayo maanta sida aan hore marar hore ugu baaqnay ee aanu soo jeedinaya xaalada degdeg Ayaan wali taageersanahay waayo dhulka qaar ayaa aad u liita markii ay xoolihii ka bexeen, markaa soo **jeedintayda koobaad** waxay tahay waa in dadkii la ururiyaa oo meel la iskugu keenaa. Waxaa kale oo aan qabaa gudidii abaaruhu wey dadaaleen ee xaalada dalka ka jirta ayaa ka tiro badatahay ee waa in iyana loo yeedhaa lana waraystaa oo laga dhagaystaa warbixina ay hayaan.

Waxaa kale oo aan soo jeedinayaa in gudi loo saaro la shaqaysa gudidaa abaaraha oo xaalada la wada ogaado tusaale ahaan dadkii barigaa u hayaamay markii ay abaartii sii badatay ee ay biyo la'aan noqdeen wax ay ku laabtaan ayay hada laayi'hiin, in kastoo dadkaa markii hore aad loo soo dhaweeyay hadan labadiiba way isla il daranyihiin.
Waxaan aad u taageersanahay mudanayaashii iga horeeyay waxaanan ku soo ururinayaa waa in aad loo wada sheqeeyaa, waxaa kale oo aan soo jeedinayaa wixii miisaaniyada golaha ah shidaalada waa in loo leexiyaa dhinaca abaaraha waad mahadsantihiin.

**Soo jeedin: -**

- Waa in dadkii la ururiyaa oo meel la iskugu keenaa si loo gaadh siiyo baad iyo biyo.
- Waa in loo yeedhaa Gudidda Abaaraha lana waraystaa oo laga dhagaystaa warbixinaha ay hayaan.

**Md. Maxamed Saalax Cige:-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, mudanayaasha iyo Shirgudoonkuba way mahadsanyihiin, mudanayaashu waxay ka wada hadleen meelihii muhiimka ahaa runtii waxaan ku darayaa woxogaa kooban, waxa laga hadlayaana waa Abaaraha baahsan ee saameeyay dad iyo duunyaba, in aan maanta wax ku darsano maanta waa waajib Dastuuriya oo ina saaraan, waxaan runtii odhan lahaa mar laga hadlaayo arimaha dabiiciga ah ama masiibooyinka dabiiciga ah, sidii ay mudanayaashii iga horeeyay ay sheegaan waa mid u taal qaranka oo dhan wax siyaasad ku saabsana

maaha waxaynu ka hadlaynaa waxaa weeyi dadkii iyo xoolihii aan ka soo tafiiranay weeyaan oo leeday, dhamaaday hada dhibaatada sii teegan ee ugu darani waa biyo la'aan oo waxay dhaaftay markii biyo iyo baad la fakarayay oo dadkii haraad ayaa dilaya oo ay u dhimanayaan.

Oo biyihii meelo fog-fog ayay gaadheen oo aanay gaadhi karin, qaarna magaalooyinka ayaa looga dhaamiyaa, taas oo aanay dadka qaar awoodin wax foosto biyo ah ay siistaan, waxaa loo baahan yahay in aan fadhiga ka kacno oo hadii ay xukumaad tahayna fadhiga ka kicino oo daba galka inaga ayaa leh oo dastuurku inaga ayuu ina siiyay arimahaa debagalka ah, sidoo kale golaha Guurtidu xaq ayay u leeyihiin arimahan ay ka hadlaan.

Waxaan soo jeedinayaa waxyaabaha kala fadhiyo wada jir ah waan ka yeelanaaye waa in aan ka yeelanaa abaarahan baahsan iyo aafooyinka qaranka, iyagaana ugu mudan wax laga wada hadlo doodana laga yeesho oo runtii bulshadana loo bandhigo meel walba laga raadiyo wixii la raadinayo, hadii ay miisaaniyad tahay iyo hadii ay arimo kale tahay intaba.

Run ahaantii wax badan ayaa wadanka magaca abaarah ku soo gala oo xukuumada ayaa gacanta ku haysa, waxaanan aad u taageerayaa mudanayaashii sheegay in loo yeedhi gudidda abaaraha ee uu madaxda ka yahay Madaxweyne ku xigeenku, sidaa daraadeed ayaa waxaa qasab noqonaysa in labada Gole la kulmiyo oo kulan wada jir loogu baaqo sida Distoorku dhigayo**Qodobkii sa 38aad** uu dhigayo oo halkaa cidii arintan saamaynta ku leh hadii ay noqonto wasaarada maaliyada iyo hadii ay gudiyada kale tahay in ay intuba warbixintooda halkaa ka baahiyaan.

Sida goboladu ay u kala liitaana loo siiyo ahmiyada, maanta iska daa xoolo e dadkii ayay qaar dhibaataysanyihiin oo gobolada qaarkood ah, halka gobolada galbeedka kuwii tagay iyo kuwii loo tagayba wey isla dhibaataysan yihiin oo hore ayay baaqyo u soo direen cidina dhag jalaq uma siin baaqyadaa waxbana looma gayn, gudoomiye dhibaatadaa aad Ayaan u la qabnaa waanan la dareensanahay.

Maanta meel la iska dhaleeceeyo ama la iska dhaliilaa ma jirtee aan u gurmano oo fadhiga ka kacno oo ciwaanka aan qaadanaynaa kaa ha noqdo, run ahaantii arinkaa Ayaan aad u adkaynayaa kaas ayaanan soo jeedinayaa. Waxaan leeyahay waan in ugu horayn la sameeyaa sidii loola xidhiidhi lahaa Madaxweyne ku xigeen ka iyo wasiirka madaxtooyada iyo cid walba oo uu arinkani khuseeyo sida maaliyada oo ay halkaa ka soo baxdo talaabada la qaadayo waanad mahadsantihiin.

**Soo jeedin: -**

- Waxaan aad u taageerayaa mudanayaashii sheegay in loo yeedho gudidda abaaraha ee uu madaxda ka yahay Madaxweyne ku xigeenku waxna laga waydiiyo xaalada uu dalku marayo.
- Waa in fadhi wada jir ah ay yeeshaan labada gole sida uu sheegayo Qodobka 38aad ee dastuurka Qaranku
- Waa in fadhigaa laga hadlaa abaarahan baahsan ee aafeeyay dadkii iyo duunyadiiba, waayo wax yaabaha kalaba waan ka yeelanaa fadhiyo wada jir ah.

**Md. Cabdikariim Aw- Cali Shabeel: -** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, xildhibaanadu hadalka intii murtida lahayd waa la wada yidhi laakiin waxaa xaqaa'iqa in ka dawlada ahaan, ka gole ahaan iyo ka shicib ahaanba si dhab ah oo sidii loo baahnaa ah aan looga hawl galin, arintaasina dareenkeeda, dhibaatadeeda iyo xanuun keedaba way leedahay.

Anigu waxaan qabaa markii la lahaa Base ayaa la bixinayaa waatii labada goleba la isugu yeedhay ee miisaankii iyo culayskii la saaray aan ogayn, markaa arinta intaa leeg ee dadkii iyo xoolihiiba ay u dhimanayaan miisaan la ma saarin, waa in labada gole la isugu yeedhaa oo baaq, gurmad dawlada iyo goleyaasha qarankuba ay u dhan yihiin la qabto ayaa loo baahan yahay oo hadii ay tahay shacabka iyo abaabul kooda dhanka booyadaha iyo miisaaniyada qaranka oo aan qabo in inta badan loo jiheeyo abaaraha waayo waan garanaynaa inta maanta xafiisyada ku baxda ee macno darada ah, waxaanan aaminsanahay in aanay jirin maanta wax la sii reebtaa.

Waxaanan xildhibaanada ku raacsanahay in arinka lagu daalo oo uu xildhibaan walba rayigiisa uu ka hadlo oo loo daayo Ayaan qabaa, arin aan la lafo gurin oo aan lagu daali midho dhal ma noqdo, waxaan arkaayay xildhibaano halkan ka leh maxaa la qabanayaa. Waxaan soo jeedinayaa in Gudi Farsamo oo arintan daba gal ku sameeya oo ilayn gole waynuhu mar walba iskuma iman karaane hada la magacaabo oo uu gudidaasi ku jahaysnaato Arintaa abaaraha waanad mahadsantihiin.

**Soo jeedin: -**

- Waa in fadhi wada jir ah la iskugu yeedhaa labada gole waayo markii base la bixinayayba waa la isku yeedhan arintana waa arin aad u mihiim ah.
- Waxaa kale oo aan soo jedinayaa in arintan hada loo saaro gudi Farsamo oo arintan dabagal ku samaysa.
- Waa in miisaaniyada qaranka inta badan loo jiheeyo Dhanka Abaaraha.

**Md. Bashiir Sh. Xuseen Tukaale: -**bismilaahi raxmaani raxiim**,** Marka ugu horaysa Asalaamu calaykum waraxmatulaahi wabarakaatu, Runtii Dalku wuxuu galay xaalad adag oo aan odhan karo gees tu gees dibi ayuu saarantahay, geeska dibigana dhinacwalba waa khatar.

Markaa sidii mudanayaashii horeba soo sheegeen in arimaha miisaaniyada dib loo eego, oo wixii horumarin iyo mashaariic ah dhamaan lagu jiheeyo xaalada uu ku jiro dalku ee abaaraha sidii looga hawl geli lahaa. Halkan waxaa lagu cel celiyay in madaxweyne ku xigeenka iyo gudidii abaaraha loo yeedho, waxaan odhan lahaa haloo yeedho madaxweynaha jamhuuriyada somaliland **Md. Axmed Maxamed Maxamuud Siilaanyo** maadama intii kale ay maqan yihiin oo madaxeynihii uu dalka ku sugan yahay, madaxeynaha haloo yeedho ayaan odhan lahaa dalkana xaalad degdega hala geliyo oo halugu jiheeyo umada maanta.

Xaalad deg deg ah ayaynu galnay xoolihii waa ay baxeen neef neefka sii nooli waa neef tamarta daran dhogortiisa cunaya heerka xooluhu gaadheen dadkii baa dhimashadii bilaabmantay xaalad la eegan karo maaha markaa dalku wuxuu u baahan yahay in la geliyo xaalad deg deg ah oo lagu jihaynayo xoog iyo xoolaba wixii aynu leenahayba abaaraha iyo sidii loo taakulayn lahaa ilaahay baa taakulada iyo dhibta ka saari kara laakiin inta karaankeena ah yaynaan waxba la hadhin xoog iyo xoolaba in la jiheeyo ayaynu u baahanahay, Asalaamu calaykum waraxmatulaahi wabarakaatu.

**Md. Maxamuud Jaamac X. Cilmi (Dable):-** Bismilaahi raxmaani raxiim, shirgudoonka iyo mudanayaasha kale waa ay salaaman yihiin mushkilada taagan iyo masaaibka taagan ilaahay waxa uu ina leeyahay wamimaa kasabat aydiinkum war inagaa isku keensanay oo denbi iyo dulmi inaga yimi weeye waxaan qabaa ilaahay wax badana wuu inaga dhaafay waa aynu ducaysanaa roob doonbaynu.

Illaahay inagama gardarna inagaa gardaran ilaahay subxaana watacaalaa aynu toobad u celino walaahi hadii aynu gacmaha taagno oo aanay niyadeenu wanaagsanayn ilaahay inaanu waxba inaga aqbalayn waayo quraanka iyo xadiiskuba waa uu sheegay ma lacag la a wadankani malaayiin lacaga ayaa yaala gudaha iyo banaankaba yaala waa aynu ka bixi karnaa sekadoo keliya ayaa ku filan maanta inagoo sidaa xaqa isaga ururina dawladoo wixii wax tara waayo waagii aan anigu garanayo dee waxaa jiri jiray miisaaniyad la yiraahdo gurmadka Emergence ayaa jiri jirtay maanta kuma taalo miisaaniyada waxaa loogu talagalaa miisaaniyadan faraha badan ee saddexda boqol ee malyuun ah galaan biyo kuma jiro oo abaarta loogu tala galay ta ugu horaysaa waxaa weeyaan in miisaaniyada sidii ragii iga horeeyay loo bedelo Emergenceoo laga jaro sidii

ay ku soo baxday digreetadu cidna lama canaantee marka masaaibku yimaadee ilaahoow naga dulqaad baa la yiraahdaa.

Inaga qodobka dastuuriga ah waxaan la yaabanahay qodobka 38 xaq buu idiin siiyay inaad istaagtaan oo aad tiraahdaa state of emergency ayuu goluhu goostay idinkaa umada ka wakiila bal berito isku soo xaadira idinkoo dhawr iyo konton ah iska soo saara 55 wuu ku khasban yahay madaxweynuhu inuu digreeto kusoo saaro marka lagu soo saaro yidhaahdo waan qaatay soo xaadira digreeto soo saara qodobka dastuurka 38 na raaca Emergence waan garayaa xaqna waa u leenahay taasi waa mid.

Dadka loo yeedhaayo wasiirka beeruhu waa inuu ku jiraa waayo waa kaalmooyinka aduunka iyo faw isagaa shaqo ku leh waxaa araajiyo yaalana isagaa haya reportigeeda waxaa loo bixin waayay isagaa og ee ha sheego waa inuu yimaadaa gudidaa u yeedhaysa waa inuu ku jiraa waayo ninka keliya ee haayadaha amar marka lasiiyo la xidhiidhi karaa waa isaga sharciga yaynaan ku tumane inagaa instuition baynu nahay taagan inagoo labada goloba iskugu yeedhanayna 55 halkan ku soo xaadira dabadeedna aynu iclaan samaynoo goaan gaadhno inaynu sidaa goosanay dawladaha iyo aduunkana wasiirka khaarajigana kusoo dara sababta arinkaas loo gaadhsiin waayay caalamka muqdisho waxaa yimi gaaladii oo dhan waa ay ku dhawaaqeen war maxaad ka xishoonaysaan waxan aad ka xishoonaysaan waa maxay masiibadan aduunka bini aadmiga ah xishood malaha dawlad la ictiraafsan yahay maaha waxa weeye waa inuu halkan yimaadaa isagu oo la cadeeyaa sababta loola hadli waayay haayadaha caalamiga ah asalaamu calaykum waraxmatulaahi wabarakaatu

**Md. Maxamed Cali Xirsi :-** Acuudu bilaahi mina shaydaani rajiim gudoomiye iyo xildhibaano waxaan idinku salaamayaa salaanta islaamka ah asalaamu calaykuma waraxmatulaahi wabarakaatu, mudanayaal iyo gudoomiye waxaynu ognahay in abaaro aad u xoogani ay dalka ka jiraan waxaynu kaloo ognahay inay jiraan gudi abaaro oo shaqaynayay mudo fara badan inaga halkan hadaladeena waxaa u badnaa in aynu u yeedhno gudiyada ee arintaasi khusayso anigu waxaan soo jeedinayaa gudoomiye suaashu maaha oo keliya haloo yeedho ee waxay tahay abaaraha maxaynu ka warhaynaa gole ahaan ilaa xad waynu ka warhaynaa oo tv-ga waa aynu ka daawanaa oo goluhu report midaysan oo ilaa xadka ay abaaruhu gaadhsiisan yihiin ma hayaa waa suaal waa qodob sida wax looga qabanayo maxaa inooga qorshaysan waa labo gudiyadu siday u shaqeeyeen waxay qabteen waxay heleen iyo waxay ururiyeen war ma u haynaa waa maya.

Anigu waxaan soo jeedin lahaa gudoomiye anoo raacsan xildhibaanada recomandationkaa ay keeneen waxaan anigu jecelahay in goleheenu u shaqeeyo si xirfad leh gudoomiye tan hada aad keentay ee ah inta loo yeedho gudi madaxweyne ku xigeen ku jiro, Su'aal lala boobo deedna ay iska tagaan, waxaanan filayaa in sidaasi golahan ayna xaq ahayn in goluhu sidaa u galo arintaa.

Waxaan qabaa in goluhu si ka balaadhan arinkaa u galo, waxa kale oo aan soo jeedinayaa in gudi gaar ah loo saaro, arintu gudidda abaaraha oo kaliya maahe ee waxay la kulmayaa gudidda abaaraha, WPF ayay la kul mayaan, sida uu sheegayay xildhibaan dable waxaa kale oo ay la kulmayaa Gudidda Arimaha aafooyinka dabiiciyaga, wasiirka beeraha, wasiirka arimaha Dibada, waxaa kale oo ay lakulmayaa hay" adaha madaxa baanaan ee sheegta in ay ku bixiyaan malaayiinta dollar iyo cid kasta oo ay khusayso. Waxaanay soo saarayaan Warbixin Culus oo dhinac walba taabanaya waa in golahan ay keenaan, intaa ka dib waa in xil dhibaanada oo xog ogaal ah ay u yeedhaan cida ay u yeedhanayaan oo ay waydiiyaan waxyaabaha ay u baahan yihiin.

Waxaan kale oo aan soo jeedinayaa in gudi lagu dhawaaqo oo ay gudidaasi laba weeg ama wax ka yar ay golaha ku horkeenaan, waxaana doonayaa in aynu ka qayb qaadano gudidda abaaraha, kaliya waa in aynaan odhan gudidu maxay samaysay, xukuumadu maxay yeeshay, ee waa in ay gobolada u baxaan oo ay soo ogaadaan xaaladaha dhabta ee jirta.

Waxaa kale oo aan soo jeedin lahaa in miisaaniyada wax laga badalo, waayo miisaniyada inaga ayaa ansixina, markii aynu ansixinayay abaaruhu way jireen kumaynaan darin waana qaladaadka aan leenahay oo wax kasta oo aan ansixinayno waa in aan iska hubinaa.

Waxaa kale oo mudan in wareegto ay jirto la soo saaray oo joojinaysa waxyaabahaa aan ka soo hadalnay ee kharashaad ahi, oo shaqaysa, taasna maba ogi, Waxaan soo jeedinayaa in uu xog-ogaal goluhu uu u noqdo waa in wax qoran aan hayno oo gudidaasi inoo soo diyaarisa in aan helno oo golaha hor keenta waad mahadsantiin.

**Md. Pr. Maxamed Cumar AdanJiir: -**Golaha iyo shirgudoonkaba waan salamayaa, in kastoo araadii la wada jiri waxaan kaliya ku darayaa woxogaa yar oo aan leeyahay malaha waa ay haboonaan lahayd, marka hore anigu ma taageersani arintan xaalada deg-dega ah ee xildhibaanadu ku wada dhawaaqeen oo waxaa imanaysa in is fahmiwaa uu yimaado Meesha taasna uma baahnin.

Waxaan imika u baahanahay oo ii muuqata in wax aan isku diidnay inaga iyo xukuumada aanay jirin laakiin waxa ii muuqata in sid rag horaba ka dhawaajiyeen in macluumaadka aan haysanaa uu yar yahay, waxanan u baahanahay oo ah waxyaabaha aan u xilsaaranahay oo ah daba-galka oo aan eegno waxa ay dawladu qabanayso oo aan ula jeedo xukuumada in aan eegno oo aan hubino la eegno in wuxu sax yihiin, dadku ma ka cabanayaa mise kama cabanayaan, inagu waxyaabaha aan soo saarnay ma ku dhaqmaysaa dawladu.

Waxaa aniga ila quman in aan fadhigan aan xidhno oo aan gobolada ubaxno oo aan soo tira koobno oo aan helno wax aan dawlada ku qoonsano aanan soo eegno meelaha wax lagu qaybiyay.

Markaa waxaan leeyahay wax aan ku qoonsan karno ma hayno, marka uu dadku baahanyahay waxyaabo badan ayuuu diidayaa oo ka cadhoonayaa, ee waa in aan ogaanaa wax yaaba saxda ah ee ka jira dalka, waana in aan dalada kula xisaabtanaa waxyaabaha aan soo aragna, hadii kale waa in aan go'aan gaadhnaa oo aan nidhaa maxaynu qaban karnaa ka dawlad ahaan.

Waxaan odhan lahaa arinkaa xaalada deg-dega ah waa in aan ka fiirsanaa maadaama oo aynaan wax aan isku qabsanay aanu jirin.

Waxaan samayn karnaa marka aan gobolada soo waraysano waa in aan u yeedhan karnaa gudidaa oo waan waraysan karnaa in kastoo aan anigu kuwada kalsoonahay gudidda oo waa niman culumi ah waana ninman dhaqaale haysta inaga oo odhan karna meelaha qaar ayay awooda saareen oo tuhin ayaa iman kara oo taa ilaahay ayaa iga og, taas qudheeda waxaan odhan karnaa. Taas qudheedana waxaan garan karnaa marka aan dhulka tagno ee aan soo indho indhayno ayaan odhan karnaa.

**Soo jeedin: -** waa in aan goleheena xidhnaa laba weeg oo aan ku soo ogaanayno xaalada dhabta ee jira ee ka jirta gobolada dalka oo dhan waana in aan soo laabanaa inaga oo warbixin dhamaystiran aan wadano oo aan ku hayl galno waanad mahad santihiin

**Md. Axmed Ducaale Bulaale:- Md. Axmed Ducaale Bulaale:-**gudoomiye tan xildhibaadana qaar ka hadleen ee ah xaalada xog-ogaal uma nihin waxaan leeyahay waan ka warqabnaa xaalada dalka waanan ka dharag-sanahay xaalada meel walba waxa ka taagan waynu wada ognahay qodobka labaad hal qodob baa meesha ka furan caawimooyinka iyo waxa la sheegayo si bay u socdaan anaguna maalintii dhawayd waatii aanu ku darnay waanu u yeedhnay dawlada hal malyan ayaa naga soo gaadhay bay yiraahdeen ganacsatadana nusmalyuun baa naga soo gaadhay haayadaha samafalka

koob shaah ahi kama Iman sababtana waa in la ogaadaa haayadaha samafalka ah ama caalamiga sheegta ee wadanka jooga wararka qaarna waxay leeyihiin haayadaha samafalku sababta ay wax bixin waayeen sida la sheegay waxaynu u baahanahay hantida soo gaadhay gudiduna hantidaa yar ama iyagu si khaldan ha u maamuleene laakiin waxaynu u baahanahay inaynu ogaano siday wax u socdaan qodobna waan soo jeedinayaa inagu qaraar keliya aynu soo saarno aynu aduunyada ugu baaqno aynu in macaawino deg deg ah in lala soo gaadho gurmadka abaaraha ilaahayna aynu roob waydiisano asalaamu calaykum waraxmatulaahi wabarakaatu.

| | |
|---|---|
| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
| **Ag. W/Hadal Qoraalka G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSI** |
| **-------------------------------------** | **-----------------------------------------** |